Su'aal & Jawaab

# JADEECO: WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO

Mugga 1
Dayrta 2017

Jadeecadu waa mid ka mid ah cudurrada la kala qaado ee ugu badan ee la yaqaan. Ku dhowaad qof kasta oo u nugul oo taabta fayrasku wuu bukoodaa. Intaa waxaa sii dheer, walxaha fayraska ee dadka cudurka qaba waxay ku sii jiri karaan hawada meel yar ama meel xiran illaa iyo laba saacadood ka dib marka uu qofka cudurka qaba ka tago. Tani waxay adkeyneysaa in la ilaaliyo qof aan iska difaaci karin fayraska jadeecada.

**Su'aal. Waa maxay jadeecadu?**
**Jawaab.** Jadeecadu waa fayras ku dhaca habdhiska neefsashada waxayna keentaa finan ka soo baxa jidhka. Jadeecada waa mid si aad ah loo kala qaado oo waxay ku faaftaa dhibcaha neefsashada ee kasoo baxa dadka qaba cudurka.

**Su'aal. Waa maxay astaamaha jadeecadu?**
**Jawaab.** Calaamadaha ugu caansan ee jadeecadu waa finanka ka bilaabma hareeraha timaha oo ku faafa qaybta dhexe ee jirka ka hor inta uusan gaarin gacmaha iyo lugaha. Jadeecadu sidoo kale waxay keentaa astaamo kale oo dhowr ah oo si wada jir ah uga dhigaya shakhsiyaadka qaba cudurka mid aad u dhibaataysan ilaa toddobaad. Dhibco yaryar oo cadcad oo afka ku wato wax buluug ah ayaa ku samaysma afka maalin ama laba maalin ka hor inta finanku jidhkaaga ka soo bixin; dhibcahaas waxaa loo yaqaan "baraha Koplik." Calaamadaha kale ee caanka ah waxaa ka mid ah qandho sare, qufac, daal iyo "conjunctivitis" ("indhaha oo noqda basali").

**Su'aal. Sidee jadeecada loo kala qaadaa?**
**Jawaab.** Jadeecada waxaa lagu kala qaadaa dhibcaha neefsashada ee dadka cudurka qaba ka imaaddo, guud ahaan qufaca iyo hindhisada. Caabuqu wuxuu dhici karaa marka dhibcahan ay ku jiraan fayraska jadeecadu ay galaan sanka ama afka. Jadeecada laguma kala qaadi karo taabashada finanka qof qaba cudurka; si kastaba ha noqotee, dadka cudurka jadeecadu ku dhacay waa qaadsiin karaan dadka kale ilaa afar maalmood ka hor intaan finanku soo bixin ilaa afar maalmood ka dib markay soo baxaan.

**Su'aal. Jadeecadu ma qatar baa mise waa mid halis ku ah nolosha?**
**Jawaab.** Caabuqa jadeecada wuxuu sababi karaa dhibaatooyin u dhexeeya shuban ama dhego xanuun ilaa dhibaatooyin aad u daran oo ay ka mid yihiin barar maskaxda (barar dhanka maskaxda ah), caabuqa sambabaha (oofwareen), qalal ama geeri. Qiyaastii saddexdii qofba hal ayaa la kulmi doona dhibaatooyin; dadkaas badankoodu waxay noqon doonaan carruur ka yar shan sano jir ama dad waaweyn oo 20 jir ah ama ka weyn. Haweenka uurka leh ee ay ku dhacday jadeecadu waxay halis ugu jiraan foosha degdega ah, dhicin lama filaan ah ama dhalida ilmo miisaankiisu hooseeyo. Dadka difaaca jirkoodu liito waxay halis dheeraad ah ugu jiraan caabuqa oo sii dheeraada xagga muddada. Marar aad u yar, dadka hore u caafimaadka qabay, caabuqa jadeecadu wuxuu ku sababi karaa cudur dilaa ah oo loo yaqaan subacute sclerosing panencephalitis, ama SSPE. SSPE waxay sababtaa xumaanshaha nidaamka neerfaha oo keenaya dhibaatooyinka caqliga iyo habdhaqanka, daciifnimo, suuxdin iyo geeri xigta. Calaamadaha cudurka SSPE waxay caadi ahaan soo baxaan sanado ka dib markii uu ku dhacay caabuqa ugu horeeya ee jadeecada.



*Sii socota >*

Children's Hospital of Philadelphia
Vaccine Education Center

Wax dheeri ah ka baro:
vaccine.chop.edu

# Su'aal & Jawaab JADEECO: WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO

**Su'aal. Sidee loo sameeyaa tallaalka jadeecada?**
**Jawaab.** Tallaalka jadeecada ee laga isticmaalo Mareykanka waa fayraska oo nool, oo la daciifiyay ah lagu beero unugyada digaagad dhal ah. Mareykanka, tallaalka jadeecada waxaa lagu daraa tallaalada qaamo-qashiirta iyo rubeellada. Tallaalkan isku dhafan, ee uu soo saaray Maurice Hilleman, waxaa badanaa loo yaqaannaa tallaalka MMR.

**Su'aal. Yay tahay inuu qaato tallaalka jadeecada?**
**Jawaab.** Tallaalka jadeecada waxaa lagula talinayaa carruurta da'doodu u dhexeyso 12 illaa 15 bilood. Qiyaasta labaad waa in la qaataa inta u dhexeysa 4 iyo 6 sano jir. Dadka waawayn ee nugul waa inay qaataan hal qiyaas oo ah tallaalka jadeecada.

**Su'aal. Tallaalka jadeecadu ma yahay mid ammaan ah?**
**Jawaab.** Tallaalka jadeecadu waa mid ammaan ah. Dhibaatooyinka mararka qaarkood iyo dhifka ah ee tallaalka MMR waxaa ka mid ah finan, qandho, damqasho goobta duritaanka, boog ku-meel-gaadh ah oo kala-goysyada ah, ama xinjirowga dhiigga oo si ku-meel-gaadh ah hoos ugu dhaco. Tallaalka MMR ma keeno ootisam.

**Su'aal. Maxay jadeecadu uga dilaacdaa Mareykanka?**
**Jawaab.** Tallaalka jadeecada si fiican ayuu u shaqeeyaa. Qiyaastii 95 ilaa 98 ee 100kii qofba waa la ilaalin doonaa ka dib marka la qaato hal qiyaas oo ah tallaalka MMR iyo 99 kamid ah 100 qof ka dib qaadashada laba qiyaasood. Si kastaba ha noqotee, maxaa yeelay fayraska jadeecada ayaa ah mid aad u faafa, xitaa dad yar oo u nugul bulshada dhexdeeda ayaa u oggolaan doona fayraska inuu faafo. Maaddaama ay jiraan kooxo dad ah oo aan is tallaali karin, in heerarka tallaalku aad u sarreeyo bulshada dhexdeeda ayaa muhiimadda ugu weyn u leh joojinta dillaaca.

> Tallaalka MMR waa mid ammaan ah. Daraasado lagu sameeyay boqolaal kun oo carruur ah ayaa la xaqiijiyay in uusan sababi karin cudurka ootisamka.



**Su'aal. Haddii la i tallaalay, ma waxaan u baahanahay xoojin tallaal jadeeco ah inta lagu jiro dillaaca?**
**Jawaab.** Maya. Tallaalka jadeecadu wuxuu keenaa difaac dheer; sidaa darteed, kuwii horey loo tallaalay caadi ahaan waxaa loo tixgeliyaa in la ilaaliyay. Haddii aadan hubin inaad tallaalan tahay iyo in kale, la tasho dhakhtar.

**Su'aal. Waa maxay sababta tallaalka jadeecada loogu daro tallaalada qaamo-qashiirta iyo rubeellada?**
**Jawaab.** Tallaalka ayaa la isku daray si loo yareeyo inta duris ee lagama maarmaanka u ah si looga hortago dhammaan saddexda cudur. Tallaalo kala gooni ah hadda lagama helo Mareykanka.

*Macluumaadkan waxaa bixiya Xarunta Waxbarashada Tallaalka ee Isbitaalka Carruurta ee Philadelphia. Xaruntu waa khayraad waxbarasho oo loogu talagalay waalidiinta iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka waxayna ka kooban yihiin saynisyahanno, dhakhaatiir, hooyooyin iyo aabbayaal u heellan barashada iyo ka hortagga cudurrada faafa. Xarunta Waxbarashada Tallaalka waxaa maalgeliya deeqsiyiin khayr qaba oo ka socda Isbitaalka Carruurta ee Philadelphia. Xaruntu wax taageero ah kama hesho shirkadaha dawooyinka soo saara. ©2017 Isbitaalka Carruurta ee Philadelphia, Dhammaan Xuquuqda Waa la Ilaayay. 17010-09-17.*

Children's Hospital of Philadelphia
Vaccine Education Center

Wax dheeri ah ka baro:
vaccine.chop.edu

© Isbitaalka Carruurta ee Philadelphia, Dhammaan Xuquuqda Waa la Ilaayay. 17010-09-17